# WASAARADDA AMNIGA GUDAHA

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# WARSIDAHA BISHA

LUULYO 2026



## HORUDHAC

Wargeyska Wasaaradda Amniga Gudaha XFS ee **Luulyo 2026** wuxuu ka hadlayaa dadaallada Wasaaradda ee lagu xoojinayo amniga dalka, horumarinta hay'adaha amniga iyo kobcinta iskaashiga gudaha iyo caalamiga ah. Intii lagu jiray bishan, Wasaaraddu waxay diiradda saartay qiimeynta xaaladda amniga, diyaarinta shirweynaha amniga qaranka, xoojinta amniga xuduudaha iyo garoomada diyaaradaha, iyo horumarinta awoodda shaqaalaha.

Sidoo kale, Wasaaraddu waxay xoojisay xiriirka ay la leedahay dalalka saaxiibka ah sida Talyaaniga, Koonfurta Kuuriya iyo dalalka ka qayb qaata AUSSOM, iyadoo laga wada hadlay tababarro, taageero farsamo iyo horumarinta hay'adaha amniga. Waxaa sidoo kale la qabtay tababbarro lagu horumarinayo maamulka maaliyadda, qorsheynta iyo hufnaanta shaqada hay'adeed.

Guud ahaan, bishaan waxay ku suntanayd xoojinta amniga qaranka, tayeynta hay'adaha, dhismaha awoodda shaqaalaha iyo ballaarinta iskaashiga amni ee Soomaaliya iyo beesha caalamka.

WASAARADDA AMNIGA GUDAHA SOOMAALIYA
MINISTRY OF INTERNAL SECURITY SOMALIA
وزارة الأمن الداخلي الصومال
MOIS

## Wasiirka Amniga Gudaha XFS oo Kampala uga qayb galay shirka wasiirrada gaashaandhigga ee dalalka ciidamadoodu ka qayb qaataan Howlgalka AUSSOM




**30-Luulyo-2026:** Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha XFS, mudane Jeneraal Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil - Fartaag ayaa maanta magaalada Kampala ee Uganda kaga qayb galay shirka wasiirada gaashaandhigga ee dalalka ciidamadoodu ka qayb qaataan howlgalka midowga afrika ee taageerada iyo xasilinta Soomaaliya (AUSSOM).

Shirka ayaa diiradda lagu saaray qiimeynta xaaladda amniga Soomaaliya, horumarka howlgalka AUSSOM, xoojinta iskaashiga dalalka ciidamada ku deeqay, iyo taageerada dadaallada lagu xaqiijinayo nabad iyo xasillooni waarta.

Wasiirka waxaa kulanka ku weheliyay wasiiru-dowlaha wasaaradda gaashaandhigga XFS, Mudane Cumar Cali, iyo Safiirka Soomaaliya ee Uganda, marwo Fardowsa Maxamed Qanyare Afrax.

## Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha XFS oo guddoomiyay shirka billaha ah ee Hoggaanka sare ee wasaaradda



**27-Luulyo-2026:** Wasiirka wasaaradda amniga gudaha ee dowladda federaalka Soomaaliya, mudane Jeneraal Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil - Fartaag, ayaa maanta guddoomiyay shirka billaha ah ee hoggaanka sare ee wasaaradda, kaas oo lagu falanqeeyay waxqabadka wasaaradda, horumarka laga sameeyay hirgelinta qorshayaasha shaqo, iyo mudnaanta howlaha horyaalla.

Intii uu shirku socday, agaasimaha guud ee wasaradda iyo agaasimeyaasha waaxyaha wasaaradda ayaa soo bandhigay warbixinno la xiriira howlaha socda, heerka fulinta qorshayaasha, iyo dadaallada lagu xoojinayo tayada iyo hufnaanta adeegyada ay wasaaraddu bixiso.

Sidoo kale, shirka ayaa si gaar ah diiradda loogu saaray diyaar-garowga shirweynaha amniga qaranka, oo la qorsheynayo in lagu qabto magaalada Muqdisho. Intii ay dooddu socotay waxaa xoogga la saaray isku-dubbaridka howlaha, qorsheynta, iyo diyaarinta hannaan mideysan oo lagu xaqiijinayo qabsoomidda shir hufan oo guul leh.

Gabagabadii shirka, Wasiir Fartaag ayaa ku bogaadiyay hoggaanka wasaaradda dadaalka joogtada ah ee ay ku bixinayaan dardar-gelinta howlaha wasaaradda iyo horumarinta waxqabadkeeda. Waxa uu ku boorriyay inay sii xoojiyaan wada-shaqeynta, isla-xisaabtanka, iyo isku-dubbaridka shaqada si loo adkeeyo amniga dalka loona horumariyo adeegyada ay wasaaraddu u hayso shacabka Soomaaliyeed.

## Wasiirka Amniga Gudaha XFS oo daah-furay barnaamijka xoojinta amniga xuduudaha iyo garoomada diyaaradaha




**23-Luulyo-2026:** Wasiirka wasaaradda amniga gudaha ee dowladda federaalka Soomaaliya, mudane Jen. Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag), ayaa maanta si rasmi ah u daah-furay barnaamijka iskaashiga dhismaha iyo xoojinta amniga xuduudaha iyo garoomada diyaaradaha Soomaaliya, oo lagu xoojinayo awoodda hay'adaha ka shaqeeya sugidda amniga xuduudaha iyo garoomada diyaaradaha.

Barnaamijku wuxuu diiradda saarayaa casriyeynta maamulka xuduudaha, tayeynta hay'adaha amniga, xoojinta amniga garoomada diyaaradaha, iyo kobcinta iskaashiga dowladda federaalka Soomaaliya iyo saaxiibbada caalamiga ah. Wasiir Fartaag ayaa sheegay in dowladda ay mudnaan siinayso dhismaha hay'ado amni oo awood u leh sugidda amniga xuduudaha iyo la tacaalidda khataraha amni ee casriga ah.

## Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha XFS, ayaa maanta xarunta Wasaaradda kulan kula yeeshay safiirka Jamhuuriyadda Kuuriya ee Soomaaliya



**22-Luulyo-2026:** Wasiirka wasaaradda amniga gudaha XFS, Jeneraal Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag) ayaa maanta xarunta wasaaradda kulan kula yeeshay safiirka Jamhuuriyadda Kuuriya ee Soomaaliya, mudane Kang Hyung-shik. Kulanka waxaa sidoo kale ka qayb galay wasiir Ku-xigeenka wasaaradda, Jeneraal Sulub Axmed Firin iyo agaasimaha guud ee wasaaradda, mudane Maxamed Shire.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray xoojinta iskaashiga Soomaaliya iyo Koonfurta Kuuriya ee dhinacyada amniga badaha, horumarinta hay'adaha amniga, la-dagaallanka burcad-badeedda, iyo tayeenta Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, Ciidanka ilaalada xeebaha iyo Ciidanka badda Soomaaliyeed. Labada dhinac ayaa sidoo kale ka wada hadlay tababarrada, is-dhaafsiga khibradaha iyo taageerada farsamo.

Wasiirka ayaa uga mahadceliyay Dowladda Koonfurta Kuuriya taageerada ay siiso Soomaaliya, isagoo adkeeyay muhiimadda ay leedahay sii xoojinta iskaashiga labada dal si loo horumariyo amniga, nabadda iyo xasilloonida.

## Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha XFS oo soo xiray tababarrada maareynta maaliyadda dowladda



**20-Luulyo-2026:** Agaasimaha guud ee wasaaradda amniga gudaha XFS, mudane Maxamed Shire, ayaa maanta si rasmi ah u soo xiray laba tababar oo lagu xoojinayay awoodda shaqaalaha wasaaradda ee maamulka maaliyadda dowladda, qorsheynta iyo diyaarinta miisaaniyadda, iyo fulinta iyo warbixinta miisaaniyadda.

Khudbaddiisa xiritaanka, agaasimaha guud ayaa sheegay in tababarradani ay qayb ka yihiin dadaallada wasaaradda ee lagu xoojinayo hufnaanta, isla-xisaabtanka iyo maamul-wanaagga, si loo hubiyo in khayraadka dowladda si hufan oo waxtar leh loo maareeyo, loona horumariyo tayada adeegyada ay wasaaraddu u fidiso shacabka.

Waxa uu ku boorriyay ka qayb-galayaasha inay aqoonta iyo xirfadaha ay kororsadeen ku dabaqaan shaqadooda maalinlaha ah, ayna gacan ka geystaan diyaarinta miisaaniyad tayo leh, xoojinta nidaamyada xakamaynta gudaha iyo soo saarista warbixino maaliyadeed oo sax ah, kuwaas oo door muhiim ah ka qaata hufnaanta maamulka dowladda.

Agaasimaha guud ayaa sidoo kale uga mahadceliyay SJGAP, Midowga Yurub iyo khubarada tababarka taageerada iyo doorka ay ka qaateen hirgelinta tababarrada, isagoo caddeeyay in wasaaradda amniga gudaha ay sii wadi doonto dadaallada lagu horumarinayo awoodda hay’adaha iyo nidaamyada maamulka maaliyadda si loo xoojiyo waxqabadka hay’adda.

## Ku-simaha Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha oo furtay tababar lagu xoojinayo maamulka maaliyadda iyo qorsheynta miisaaniyadda




**13-Luulyo-2026:** Ku-simaha agaasimaha guud ahna agaasimaha maamulka iyo maaliyadda ee wasaaradda amniga gudaha XFS, marwo Ifraax Salaad, ayaa maanta si rasmi ah u furtay tababar soconaya muddo hal toddobaad ah oo lagu xoojinayo maamulka maaliyadda dadweynaha, qorsheynta miisaaniyadda iyo diyaarinteeda.

Tababarka ayaa waxaa ka qayb-galaya 21 xubnood oo ka tirsan shaqaalaha wasaaradda amniga gudaha, kuwaas oo isugu jira shaqaalaha waaxda maaliyadda iyo waaxyaha kale ee wasaaradda. Ujeeddada tababarkan ayaa ah kor u qaadidda aqoonta iyo xirfadaha shaqaalaha si loo horumariyo qorsheynta iyo maamulka maaliyadeed ee Wasaaradda, loona xoojiyo hufnaanta, daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka hay'adeed.

Marwo Ifraax Salaad ayaa ku boorisay ka qayb-galayaasha inay si buuxda uga faa'iideystaan fursadda tababarka, iyadoo xustay in dhismaha awoodda shaqaalaha uu laf-dhabar u yahay maamul maaliyadeed oo hufan iyo bixinta adeegyo dowladeed oo tayo leh.

Sidoo kale, agaasimaha waaxda shaqada iyo shaqaalaha ee wasaaradda ayaa bogaadiyay shaqaalaha ka qayb-galaya tababarka, isagoo ku dhiirrigeliyay inay ka faa'iideystaan aqoonta iyo xirfadaha lagu gudbinayo muddada uu socdo tababarku, si ay uga qayb qaataan horumarinta waxqabadka Wasaaradda.

Inta uu socdo tababarka, waxaa diiradda lagu saari doonaa hababka casriga ah ee maamulka maaliyadda dadweynaha, qorsheynta iyo diyaarinta miisaaniyadda, si ka qayb-galayaashu u helaan aqoon iyo xirfado wax-ku-ool ah oo gacan ka geysanaya tayeynta nidaamyada maaliyadeed iyo hirgelinta maamul wanaagsan oo wasaaradda ah.

Tababarka waxaa bixinaya khubaro la shaqeysa wasaaradda amniga gudaha, kuwaas oo leh khibrad iyo aqoon durugsan oo ku saabsan maamulka maaliyadda dadweynaha iyo qorsheynta miisaaniyadda.

## Ku-simaha Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha oo daahfurtay tababar lagu tayeynayo qorsheynta sanadlaha ah



**09-Luulyo-2026:** Ku-simaha agaasimaha guud ahna agaasimaha maamulka iyo maaliyadda ee wasaaradda amniga gudaha XFS, marwo Ifraax Salaad, ayaa maanta furtay tababar loo qabtay agaasime-waaxeedyada iyo qaar ka mid ah shaqaalaha wasaaradda, kaas oo lagu xoojinayo diyaarinta qorshe-hawleedka sanadlaha ah.

Furitaanka tababarka, marwo Ifraax Salaad ayaa adkaysay muhiimadda qorsheyn hufan oo ku dhisan wada-tashi iyo isla xisaabtan, si loo dardargeliyo hirgelinta mudnaanta Wasaaradda loona horumariyo tayada adeegyada amniga ee loo fidiyo shacabka Soomaaliyeed.

Tababarkan ayaa qeyb ka ah dadaallada wasaaradda ee lagu tayeeynayo qorsheynta, xoojinta awoodda hay'adda iyo kor u qaadidda waxqabadka.

## Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha XFS oo guddoomiyay kulanka joogtada ah ee agaasime waaxeedyada

**06-Luulyo-2026:** Agaasimaha guud ee wasaaradda amniga gudaha ee XFS, mudane Maxamed Shire, ayaa maanta guddoomiyay kulanka joogtada ah ee agaasime waaxeedyada wasaaradda, kaas oo lagu qiimeeyay horumarka howlaha socda, laguna heshiiyay mudnaanta shaqooyinka la fulinayo muddada soo socota.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray dardar-gelinta hirgelinta qorshayaasha wasaaradda, xoojinta isku-duwidda howlaha, dib-u-habeynta iyo tayeenta shaqaalaha, iyo adkaynta wada-shaqeynta hay'adaha amniga si loo sii xoojiyo amniga dalka.



Sidoo kale, kulanka waxaa lagu lafa-guray heerka diyaar-garowga shirka amniga guud ee heer qaran, iyadoo la isla qaatay in la xoojiyo isku-duwidda iyo qorsheynta si shirkaasi ugu qabsoomo si hufan.

Gabagabadii, Agaasimaha guud ayaa agaasime waaxeedyada faray inay sii xoojiyaan wada-shaqeynta, dardargeliyaan fulinta qorshayaasha wasaaradda, isla markaana mudnaan gaar ah siiyaan howlaha la xiriira diyaarinta shirka amniga guud ee heer qaran.

## Soomaaliya iyo Talyaaniga oo kala saxiixday heshiis lagu xoojinayo iskaashiga amniga



**03-Luulyo-2026:** Wasiirka wasaaradda amniga gudaha ee XFS, Jen. Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag), ayaa maanta magaalada Muqdisho ku qaabilay dhiggiisa Dowladda Talyaaniga, mudane Matteo Piantedosi, Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Jamhuuriyadda Talyaaniga, oo booqasho rasmi ah ku yimid dalka.

Kulanka waxaa Wasiirka Amniga Gudaha ku weheliyey Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, S/Gaas Asad Cismaan Cabdullaahi, iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha, mudane Maxamed Shire, kuwaas oo ka qayb galay wada-hadallada iyo munaasabadda saxiixa heshiiska.

Kadib wada-hadallo miro-dhal ah, labada Wasiir ayaa kala saxiixday Heshiis Is-afgarad oo lagu xoojinayo iskaashiga labada dal ee dhinacyada amniga, tababarrada Ciidanka Booliska, la-dagaallanka argagixisada, horumarinta hay’adaha amniga, iyo arrimaha socdaalka.

Heshiiska ayaa si gaar ah diiradda u saaraya horumarinta barnaamijyada waxbarashada iyo tababarrada xirfadeed ee Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, tayeenta iyo kobcinta aqoonta tababarayaasha Soomaaliyeed si ay iyaguna u tababaraan ciidamada kale, is-weydaarsiga saraakiisha iyo booqashooyinka waxbarasho, iyo is-dhaafsiga khibradaha, aqoonta, iyo hababka ugu wanaagsan ee lagu horumarin karo hay’adaha amniga.

Labada dhinac ayaa adkeeyey in heshiiskani uu ku saleysan yahay ixtiraamka shuruucda labada dal iyo waajibaadka caalamiga ah, isla markaana uu gacan ka geysan doono xoojinta awoodda hay’adaha amniga, sare u qaadidda xirfadaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, iyo kor u qaadidda dadaallada lagu xaqiijinayo nabadda, xasilloonida, iyo la-dagaallanka khataraha amni ee ay wadaagaan Soomaaliya iyo Talyaaniga.

info@mois.gov.so
www.mois.gov.so

Via Tanzania 888 Building,
Mogadishu, Somalia

MoisJFS

mois_fgs